Seattle Fire Department sfd CAM
Qoraalka Taakuleynta Macaamilka
5022
Ruqsada Seattle
—qeyb ka mid ah taxanaha waaxyada-badan ee ku qoran adeegyada Magaalada iyo shattiyada

# Shuruucda Dabka Banaanka iyo Wixii Mamnuuc ah

*Waxaa la cusboonaysiiyay Janaayo 2024*

Dabka banaanku guud ahaan waa ka mamnuuc City of Seattle.

Waxaa jira xaalado xadidaad u ah sida ay dhigayaan dabka loogu talo geley madadaalo ee la ogol yahay, taas oo bixisa xadidaad shuruudaha dabka oo ay tahay in la buuxiyo, iyo inay ogoshahay tayada hawadu in banaanka lagu gubo.

## Qeexitaano

Dabka madadaalada banaaku waxaa weeye dabka loo adeegsado dhuxusha ama xaabada ee lagu gubo meel loogu talo geley ama hanti gaar loo leeyahay oo wax lagu kars-ado, madadaalo, munaasabado ama wax kale oo lamid ah. Dabka loo isticmaalo ku gubista qashinka looma arko dab madadaalo.

## Goorma ayaa Loo Baahan Yahay Ruqsada?

Ruqsada Waaxda Dabdamiska looma baahan si loo adeegsado meesha dabka ee la qaadi ee banaanka ah, dabka madadaalo iyo dabka wax lagu-kariyo iyada oo uu ka dheer yahay moojee dabku sadex fuudh baliciisu iyo laba fuudh dhererkiisu. Dabka ka badan sadexda fuudh oo lagu dhuftay laba fuudh waxa uu u baahan yahay ruqsado laga helo Hay'ada Hawada Nadiifta ah ee Puget Sound iyo Waaxda Dabdamiska Seattle.

## Shuruucda Tayada Hawada

Marka tayada hawadu ay liidato, Hay'ada Hawada Nadiifta ah ee Puget Sound waxa ay diidi karaa gubista dabka ee gudaha iyo banaanka. Si aad u ogaato u mamnuucista dabka ee tayada hawadu inay jirto, la hadal 1-800-595-4341, ama booqo websaytkeena www.pscleanair.org.

## Shuruudaha Dabka Madadaalo (Xeerka Dabka Seattle)

Dabka madadaalo waxaa weeye ka wax lagu kariyo, madadaal, diimeed, munaasabad ama ujeedooyin kale oo lamid ah taas oo dabka aan lagu shidin meel banaanka ah oo dabka lagu shido, ama moofo.

Dababka madadaalo waxaa kaliya la ogolaadaa hadii dhamaan shuruudaha soo socda la buuxiyo:

1. Ma jirto wax mamnuucitaan ah oo tayada hawada darteed ah.
2. Dabku kama badna sadex fuudh cabirkiisu iyo laba fuudh dhererkiisu.
3. Dabku waxa uu ku yaalaa ugu yaraan meel 25 fuudh u jirta dhismp ama alaab meel taal. Xaaladaha keeni kara dabku inuu faafo waa in meesha laga saaraa kahor inta aan la shidin.
4. Qashinka, barxada qashinka, ama wixii waraaqo ah waa in aan la gubin.
5. Agabka lagu damiyo dabka waa in la diyaarsadaa si loo isticmaalo. Waxa taas kamid ah majarafadaha iyo laba baaldi oo biyo ah, ama tuunbada beerta oo biyaha lasoo geliyay ama dab damis leh qiimaynta 4-A.
6. Dabka waa in qof wayni uu la joogaa ilaa inta uu wada damayo.
7. Dabka waa in la lagu shidin meel- dadka ka dhaxaysa oo dabku ka mamnuuc yahay, sida beer nasasho ama barxada dugsiga. Dab damiska kaliya waxaa -loo ogol yahay meelo gaar ah, iyo meesha ay ku haboon tahay in lagu gubo ee loo ansixiyay.
8. Hadii dabku guri dhaxdii lagu gubayo, gurigu waa in uu lahaada ugu yaraan 200 oo fuudh oo dhisan.

Waaxda Dabku waxay kugu khasbi kartaa inaad dabka damiso hadii xaaladahan aanad buuxin ama wakhti kasta oo dabka banaanku loo arko inuu keenay xaalad qalafsan.

## Alaabta Mamnuuca ah

Alaabaadka soo socda waxaa dhici karta in aan lagu gubi karin banaanka - qashinka, xayawaanka dhintay, laami, wixii- shidaalka ka samaysan, ranjiga, alaabaadka caaga

ah, caaga, waraaqaha (marka laga tago marka ay daruuri tahay in dabka lagu shido), kaadhadh, looxaan, alaabadka kasoo hadha dhisme/burbur, birta, ama wixii kale ee alaab ah (marka laga tago wixii khudaarta caadiga ah) kuwaas oo caadiyan soo saara sun wasakhda ah, qiiq culus, ama ur marka uu gubadanyo.

### Isticmaalka Goobaha Dabka ee La Qaado

Goobta dabku waxaa weeye ta loogu talo geley- shaqada wax ku karin ama goobta dabka ee dhismaha, marka laga tago kuwa la qaado karo, banaanka, dhigaalka adag isticmaala ee -dabka. Waxaa laga samayn karaa bir, sagbad ama dhoobo oo waxay yeelan karaa meel yar oo qiiqo ka baxo ama ma yeelan karaa.

Isticmaalka girgiraha dabka waa la ogol yahay hadii la buuxiyo shuruudaha soo socda:

1. Ma jirto wax mamnuucis ah oo tayada hawada darteed ahi.
2. Girgiraha dabku meeha in la dhigo daaqada ama barandada oo looma ogola inuu 15 fuudh u jirsado dhismaha ama wixii alaab ah ama dhir-ta. Isticmaalka girgiraha dabka ee qoyska kaliya iyo guryaha badan ayaa laga soo reebaa shuruudahan.
3. Qashinka, barxada qashinka, ama wixii waraaqo ah waa in aan loo adeegsan in wax lagu gubo.
4. Agabka lagu damiyo dabka waa in la diyaarsadaa- si loo isticmaalo. Waxa taas kamid ah majarafadaha iyo laba baaldi oo biyo ah, ama tuunbada beerta oo biyaha lasoo geliyay ama dab damis leh qiimaynta 4-A.
5. Dabka waa in aan lagu shidin meel dadka ka dhaxaysa oo dabku ka mamnuuc yahay, sida beer nasasho ama barxada dugsiga. Dab damiska kaliya waxaa-loo ogol yahay meelo gaar ah, iyo meesha ay ku haboon tahay in lagu gubo ee loo ansixiyay.
6. Waa in loo isticmaalaa si waafaqsan tilmaamaha shirkada soo saartay.

### Goobaha Lagu Kariyo Cuntada baanka Lagu Cuno/ Goobaha Banaanka ah ee Hilibka Lagu Solo

Xeerka Dabka Seattle ma mamnuucayo isticmaalka goobaha banaanka ah ee wax lagu dubo ee balakoonnada, sagxadaha, iyo barxadaha. Si kastaba ha ahaatee, aad maamulka dhismaha ama HOA ayaa laga yaabaa inay leeyihiin xeerar dheeraad ah ku saabsan BBQ-yada waa inaad ogaataa oo aad raacdaa. Furfuran awgeed ololka iyo gaasaska sunta ah ee ay soo saaraan, goobaha dubitaanka ee BBQ maaha in loo ogolaado in lagu kaydiyo ama lagaga hawlgalo gudaha guri.

Waxaa lagu talinayaa in propane, dhuxusha, ama wax kale oo shidaal ah solayyada laguma isticmaalin dusheeda ama gudaha 10 cagood oo sagxadaha oo dab qabsan kara, sida alaabta guriga, biraha hilibka lagu dubo, ama geesaha dhismaha. Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg buug-yaraha badqabka cuntada lagu dubo banaanka ee SFD.

**ISKA BARI YEELIDA MASUULIYADA SHARCIGA:** *Foomkaan Macluumaadka Caawimaada Macmiilka (CAM) looma adeegsan karo inuu badal u noqdo xeerarka iyo qaanuuna-da. Shakhsiyaadka waxay mas'uul ka yahiin u -hoggaansamida dhamaan sharuudaha xeerka iyo sharciyada, haddii lagu sharaxay CAM ama haddii aan lagu sharaxin.*